

Muxuu ilmahaygu ugu baahanayaa tuubada caloosha?

Go'aanka ah in tuubada quudinta caloosha la galiyo sida badan wuu ku adag yahay qoysaska. Waxaa laga yaabaa in waalidiintu ay dareemaan dambi ah in aysan dabooli karin baahida nafaqada cunuggooda.

Waxaa muhiim ah in qoysaska ay ogaadaan in sababta ilmahiisu ugu baahanyahay tubada quudinta ay la xiriirto naafanimada ilmaha, mana aha mid ka tarjumeysa dadaalka qoyska. Carruurta leh laxaad la'aanta korriinka sida cerebral palsy oo kale, waxay halis ugu jiraan dhibaatooyin kala duwan oo quudinta ah.

Hadafkayaga guud waa in aanu qoysaska ka caawino inay gaaraan go'aanka ugu fiican cunuggooda.

Sababaha caamka ah ee tuubada quudinta caloosha ee gastrostomy waxaa ka mid ah:

- Koritaan xumada (in kasta oo ay jirto cunto dheeraad ah). ilmaha si xun u koraana wuxuu noqon karaa mid si joogto ah u nafaqo-darrada. Tani waxay ilmaha halis ugalin kartaa dhibaatooyin badan oo ay ka mid yihiin: halista caabuqyada oo kordha, bogsashada nabarka oo liitada qalliinka kadib, bogsashada nabarada maqaarka oo liidata, iyo guud ahaan tamarta oo hoos u dhacda oo ay weheliso awood yar oo dhanka koriinka ah.
- Waqti iyo dadaal aad u weyn oo dhanka quudinta ah. Bukaano badan oo qaba cudurka neerfayaasha iyo murqaha waxaa ku adag liqista. taasina waxay qoysaska u noqon kartaa mid aad niyad-jab ugu ah. Waqtiga dheeriga ah ee aad ku bixisaan quudinta adiga iyo ilmahaaga wuxuu yareyn karaa wakhtiga adiga iyo ilmahaaga aad u haysaan hawlaha kale.
- Aspiration. asbayreeshin waxay dhacdaa marka waxyaabaha ku jira afka ama caloosha ay galaan tubada neefsashada ama sambabada inta lagu guda jiro quudinta afka, taas oo keenta dhibaatooyin ku soo noqnoqda neef-mareenka (caabuqyo, xiiq, iwm.) asbayreeshin waxay keeni kartaa raaxo la'aan taas oo hoos u dhigi karta xiisaha cunuggaaga uu u qabo quudinta.


Maxay yihiin Tuubooyinka Caloosha?

Tuubooyinka caloosha waa tuubooyin jilicsan oo dabacsan, kuwaas oo la geliyo caloosha, loona adeegsado quudinta shaqsiyaadka ay ku adag tahay in ay wax cunaan.

Tuubada caloosha waxaa la galiyaa inta lagu guda jiro qalliinka. Dalool yar oo loo yaqaano "stoma" ama "Gastrostomy" ayaa laga sameeyaa caloosha, Caadi ahaan tubada waxay ku jiraysaa daloolka caloosha, haddii tubada laga soo saaro, waxaa laga yaabaa in daloolka caloosha yaraado ama xataa xirmo.

Tuubooyinka caloosha waxaa dhici karta in waqtiga oo dhan la isticmaalo oo aanay jirin quudinta afka laga qaato, ama waqtiga badhkii iyada oo laga dhigayo quudin dheeraad ah oo dareeraha laga siiyo, ama mudada xanuunka la isticmaalo. Dhakhtarkada ayaa kuu sheegi doona waxa afka laga cuni karo iyo waxa habboon in lagu siiyo tuubada.

Daryeelka tubooyinka caloosha way fududahay. Kalkaalisada ama dhakhtarka ayaa ku bari kara sida tubooyinka guriga loogu bedelo. Xusuusnow inaad qaadatid qoraalo si aad u tixraacdo hadhaw.



This information is for educational purposes only. It is not intended to replace the advice of your health care providers. If you have any questions, talk with your doctor or others on your health care team.

If you are a Gillette patient with urgent questions or concerns, please contact Telehealth Nursing at 651-229-3890.

Ilmahaygu ma awoodi doonaa inuu afkiisa ku cuno haddii tuubada quudinta la galiyo?

Carruurta aan cunada sababka ka aadin waxay awoodaan inay sii wadaan inay afka ka qaataan cuno kadib marka tuubada caloosha la galiyo. Qaadashada cunada ee afka ayaa laga yaabaa inay noqoto mid wacan marka aysan jirin walaac ama cadaadis la xiriira in aad cunuga afka ka siiso cuno ku filan baahidiisa. Dhakhtarkada ayaa kuu sheegi doona in ilmahaagu uu wali wax ka cuni karo afka ama dhadhamo afka ah. (qoraal sida dhadhamada afka ah loo siiyo ayaa yaala). Dhakhtarkada wuxuu kuu sheegi doonaa nooca caanaha ay tahay in lagu siiyo tubbada.

Tuubada quudinta joogto miyaa?

Qaar ka mid ah carruurta ayaa dib u hela awoodooda in ay afka ka wada qaataan baahiyahooda nafaqada. Taasi haday dhacdo, tuubada waa laga saari karaa, meeshana way bogsooneysaa.

Intee in le'ek ayuu ilmahaygu isbitaalka ku jiri doonaa?

Marka tuubada la galiyo kadib, cunuggaagu wuxuu isbitaalka joogi doonaa qiyaas ahaan 1 ilaa 2 maalmood si loo sameeyo jadwalka quudinta tuubada ee idiin fiican adiga iyo cunuggaaga, iyo si loo hubiyo in ilmahaagu u dulqaadanayo quudinta ka hor bixinta. Waxaa lagu siinayaa tilmaamo ku saabsan isticmaalka iyo daryeelka tuubada ka hor inta ilmuhu uusan isbitaalka ka bixin. Sidoo kale waxaa lagu siinayaa telefoonka Kalkaalisada caafimaadka ee kiliiniga si aad usoo wacdo hadaad su'aalo qabto ama dhibaatooyin jiraan markaad guriga aado.

Waxaa laga yaabaa inay kuu tahay mid ku caawin karta inaad la sheekaysatid qoys leh ilmo haysta tuubada quudinta ee caloosha, isla markaasna aad maqashid waayo aragnimadooda. Fadlan noo sheeg haddii aad jeceshahay inaad tan samayso. Intaas waxaa dheer, wixii su'aalo ah oo aad qabto diyaar ayaan u nahay. Fadlan noo sheeg sida aan kaaga caawin karno go'aankan.

This information is for educational purposes only. It is not intended to replace the advice of your health care providers. If you have any questions, talk with your doctor or others on your health care team.

If you are a Gillette patient with urgent questions or concerns, please contact Telehealth Nursing at 651-229-3890.